

UJEEDO: WAKAALAD GAAR AH "PROCURO DE SPECIALE"

Maanta oo ay taariikhdu tahay 17/05/2025, Anigoo ah **Dr. Maxamed C/laahi Maxamed "Max'ed Nootayo"**, Lehna Nootaayaha Tayo, Xafiisna ku leh Wadada Koowaad ee Suuqa Bakaaraha Dhinaca Galbeed ee Daarta Maalin Tajir ee Magaalada Muqdisho, Waxaa iiyimid ayagoo heshiis ah, Mudanayaasha hoos ku Xusan:-

WAKAALAD BIXIYE:- CISMAAN SHARIIF MAXAMED, Ina Faadumo Macalin Nuur Ibraahim, Somali ah, Ku Dhashay Muqdisho, Sanadkii: 10-10-1985, Degan Hodan, Sita: Warqad Sugnaan, Lr. 787527, Kana soo baxay Dowladda Hoose ee Muqdisho

LA WAKIISHE:- JAMILA SHARIF MOHAMED, Hooyo Faadumo Sufi Mohamed, Somali ah, Ku Dhalatay: Muqdisho, Sanadkii: 09-09-1979, Degan Hodan, Sita: Somali Passport, Lr. P01664287

TILMAAMAHA DHULKA

Dhul Ku yaal: (Gobolka Shabeelada Hoose Degmada Afgooye Ceelasha Biyaha Gaar ahaan Jabadgelle), Cabirkiisuna yahay (Waqooyi 5.5m , Koofur 7m , Bari 20m, Galbeed 20m.)-M, W.M.L: (Rep.001266/NB/2019), Tr. 11/03/2019, Kana Soo Baxay Banaadir Public Notary, Uuna Saxiixay Dr. Cabdiraxmaan Warsame Siyaad

SOOHDINTA DHULKA

Waqooyi: **Jid**, inta kale Deegaano dad .

B- Aniga oo ah **CISMAAN SHARIIF MAXAMED**, Waxaan qoraalkaan ku Cadaynayaa Aniga oo Maskaxda iyo Caqligaba ka fiyow Cid I qasabtayna aysan Jirin in aan Wakiishay Walaashey **JAMILA SHARIF MOHAMED** Una Wakiishay Wakaalad Gaar ah, oo Ku Saabsan Dhulka Tilmaamihisu Sare Ku Xusan yihiin, in Dhulkaas ay gadi karto, Wareejin karto, Hibeyn karto, dhisi karto, ijaari karto, u dacwoon karto, qareen u qaban karto, uguna doodi karto Maxkamadaha dalka hortooda, Waxaan mar kale sii caddeynayaa in **JAMILA SHARIF MOHAMED** awoodaas aan siiyay ay u madax banaan tahay oo aniga Dhulkaas aan soo sheegay ka macaamilidiisa wax la iiga baahan karo aysan jiri doonin.

T- Aniga oo ah **JAMILA SHARIF MOHAMED**, Waxaan Nootaayada Horteeda Ka Caddaynayaa in aan aqbalay Wakaalada uu isiiyey Walaalkay **CISMAAN SHARIIF MAXAMED**, islamarkaana aan Xilkaas aan ugu Soo Bixi doono Si Hufan oo Shareecada Islaamka Waafaqsan Insha Allah.

SAXIIXA WAKAALAD BIXIYAHA

CISMAAN SHARIIF MAXAMED

SAXIIXA LA WAKIISHAHA

JAMILA SHARIF MOHAMED

1- ABDIRIZAK ALI MOHAMED

2- ABDISHAKUR ABDULAHI ALI

(XAFIISKA NOOTAAYAHA)

REP. 1582/T.P.N/25, Tr. 17/05/2025, Muqdisho, Anigoo ah Nootaayaha Tayo:- **Dr. Maxamed C/laahi Maxamed "Max'ed Nootayo"**, Waxaan Sugayaa in Saxiixyada Kor Ku Xusan ay yihiin Saxiixyadii Runta ahaa ee **1- CISMAAN SHARIIF MAXAMED** Ahna (Wakaalad Bixiye), **2- JAMILA SHARIF MOHAMED** Ahna (La Wakiishe) iyo Markhaatiyaasha, Waxaana Laga Wada Saxiixay ayagoo Raali ah, Caafimaad Qaba, Maskaxdoodu Taam tahay, Cid Khasabtayna aysan jirin Ka dib Markii Loo Aqriyey Wakaaladaan, Waxaa Lagu Qoray Diiwaanka Guud ee Nootaayaha Wadanka Loo Keydiyey Nuqul.

By: ABDUL

NOOTAAYAHA

Dr. Maxamed C/laahi Maxamed "Max'ed Nootayo"





JAMHUURIYADA FEDERAALKA SOOMAALIYA
BANAADIR PUBLIC NOTARY

Tel:0615347459/0617633650 .Nootayobanaadir@gmail.com

Rep.001266/NB/2019

Date:-11/03/2019

Ujeedo:-Heshiis ku saabsan Kala Gadasho dhul banaan

Afgooye C/biyaha maanta oo ay taariikhdu tahay 11/03/2019 waxaa xafiiska Nootayaha Hor Yimid labada nin ee kala ah 1:C/qaadir Xasan Cumar hooyo Iidaay Maxamed Cali kudhashay Muqdisho 1972kii 2:Cali Xasan Cumar hooyo Faadumo Xasan Cumar kudhashay Muqdisho 35jir ah sawiradooduna kor kudhegan yihiin ahna niman xafiiska laga yaqaano ahna milkiilayaasha iyo wakiilada dhaxaltooyada dhamaan reer Xasan Cumar Muxudiin iyo dhul kuyaala gobolka sh/hoose degmada Afgooye C/biyaha gaar ahaan Jabadgeelle, cabirkiiisuna yahay waqooyi 5.5m koofur 7m Bari 20m Galbeed 20m Soohdintiisuna tahay **Waqooyi Jid** inta kale deegaano Dad ayaa ka xigga , Hadaba C/qaadir Xasan Cumar iyo Cali Xasan Cumar wexeey Heshiiskan ku cadeynayaan iyagoo Kafayoow Maskaxda Cid Qasbaysana Aysan Jirin in eey iska gadeen dhulkooda kor ku xusan wexeeyna kagadeen kuna wareejiyeen Cismaan Shariif Maxamed Hooyo Faadumo Macalin Nuur Ibraahim Kudhashay Xamar 1985kii kana siiyeen qiimo dhan Doolar,(700S) (Todobo boqol oo doolar) oo kaliya Dhamaan lacagtaasi waa lawada siiyey iska gadayaasha (ahna wakiil) sida eey ka qirteen Nootayadda Horteeda sidaa daraadeed milkiyaddii Dhulkaan Kor Kuxusan Tasarufkiisa iyo waajibaadkiisaba wuxuu u wareegay Cismaan Shariif Maxamed Laga bilaabo Maanta oo ay taariikhdu tahay 11/03/2019,wexeey kaloo cadeeyeen iska gadayaasha ahna wakiilo in dhulkaani ka madax banaan yahay rahan xuquuq dad kale leeyihiin iyo wax kastoo hor joogsan karra heshiiskan=====

Saxiixa iska Gadayaasha ahna wakiil

Saxiixa Iibsadaha

1:C/qaadir Xasan Cumar 2: Cali Xasan Cumar

Cismaan Shariif Maxamed

Markhaatiyaal

1-Xasan Maxamuud Calasoow 2-Cabdi Xasan Cumar 3-Xasan C/laahi C/raxmaa

Sugitaanka Saxiixyada:

Rep. 001266/NB/2019

Anigoo ah Dr.Cabdiraxmaan Warsame Siyaad lehna xafiis ku yaala D/Howlwadaag bakaaro,iyo Ceelasha biyaha, waxaan halkaan ku cadaynayaa in heshiiska kor ku cad lagu qoray Nootayadda horteeda ayna saxiixeen dhinacyada ay khusayso Nootayaduna hubisay inay yihiin kuwii dhabta ahaa ee lahaa magacyadaas iyo saxiixyadaas kor ku qoran waana mid waafaqsan shareecada islaamka iyo sharuucda madaniga ah ee dalka, laguna qoray diiwaanka nootayada

By. Adan



NOOTAAYAHA

Dr..Cabdiraxmaan Warsame Siyaad




FOOMKA BIXINTA DUKUMINTIGA

Tr. 22/05/2025

Aniga oo ah **Maxamed Cabdi Cali** waxaan halkaan ka cadeynayaa in aan ku wareejiyay **Jamiilo Shariif Maxamed** Dukumiintiga **Original** Wakaalada Gaarka ah **Rep No. 1582/T.P.N/25, Tr. 17/05/2025**, faah faahintiisuna tahay sidan soo socota:

Magaca La Wakiishaha	Jamiilo Shariif Maxamed
La Wakiishay	Dhul
Cabirka	Waqooyi 5.5m , Koofur 7m , Bari 20m , Galbeed 20m .
Ku Yaallo	Muqdisho, Degmada Gobolka Shabeelada Hoose Degmada Afgooye Ceelasha Biyaha Gaar ahaan Jabadgeelle
Lotto Lambar	
W.M.L	Rep.001266/NB/2019, Tr. 11/03/2019 Ka soo baxday Nootaayo Banaadir
Taariikhda Wakaalada	17/05/2025

La Wakiishe: Aniga oo ah **Jamiilo Shariif Maxamed**, Leh Tel No. **0615514186**, Degan **Muqdisho** Waxaan Halkaan ka Cadeynayaa in aan ka Qaatay Xafiiska **Nootaayaha Tayo** Dukumiintiga Wakaalada faah faahinteedu Sare ku cadahay.



SAXIIXA DUKUMINTI BIXIYAHA

Maxamed Cabdi Cali

SAXIIXA DUKUMINTI QAADAHA

Jamiilo Shariif Maxamed

Jamiilo